

## **Shuruudahaan waa inaad buuxisaa inta aadan dalban inaad taksi waddo**

Waa inaad buuxisaa 21 sano leesinka baabuur wadiddana ee B aad heysatay 2 sano, ama in aad heysato leesinka baabuurwadidda ee D.

Waa inaad martaa imtixaanka tijaabinta qaab nololeedka wanaagsan ee qofka (vandelsprövning). Waxaa loola jeedaa kontorool ah haddii aad hore u soo muteysatay wax ciqaab ah ama laguugu xukumay wax dambi ah. Imtixaanka tijaabinta qaab nololeedka wanaagsan ee qofka (vandelsprövning) waxaa la sameeyaa marka aad codsiga xareyneeyso.

Waa inaad sameysaa baaritaan dhakhtar oo muujinaya inaad buuxineyso shuruudaheenna caafimaad innaga oo tixgalineyna ammaanka rakaabka iyo gaadiidleyda kale.

Waa inaad jawaab hordhac ah ka dalbataa hey'adda gaadiidka haddii aad shaki ka qabto inaad buuxineyso shuruudaha imtixaanka tijaabinta qaab nololeedka wanaagsan ee qofka (vandelsprövning) iyo shuruudaha caafimaadka.

Waa inaad ku baastaa imtixaannada akhriska iyo kuwa wadidda. Imtixaanka akhriska wuxuu ka kooban yahay saddax qeybood: akhrinta khariidada, ammaanka iyo sharciyada.

Imtixaanka wadidda wuxuu imtixaamayaa aqoontaada iyo xariiftinimadaada ku aaddan qaab dhismeedka baabuurka, ammaanka rakaabka, kuwadidda waddada taraafikada, helidda goobaha kala duwan iyo kartida qiimeyn.

Imtixaanka akhriska iyo kan wadidda waxaa lagu sameyn karaa mid ka mid ah xarumaha baabuur wadidda ee Hey'adda taraafikada. Imtixaanka akhriska waxaa lagu sameynayaa luqadda iswiidhishka.

Marka aad buuxiso dhammaan shuruudaha oo aadna ku baasto imtixaanada ayaa waxaad dalban kartaa kaarka aqoonsiga taksi-wadidda.

**Ma rabtaa inaad akhriso macluumaad dheeri ah oo ku saabsan shuruudaha looga baahan yahay qofka raba inuu dalbado kaarka aqoonsiga taksi-wadidda? Halkan waxaad ka heleysaa warbixin dheeraad ah:**

Xeerka taraafikada taksiga (2012:238) cutubka 3.

[https://www.riksdagen.se/sv/dokument-lagar/dokument/svensk-forfattningssamling/taxitrafikforordning-2012238\\_sfs-2012-238](https://www.riksdagen.se/sv/dokument-lagar/dokument/svensk-forfattningssamling/taxitrafikforordning-2012238_sfs-2012-238)

Cutubka sharciyada taraafikada taksiga (2012:211)

[https://www.riksdagen.se/sv/dokument-lagar/dokument/svensk-forfattningssamling/taxitrafiklag-2012211\\_sfs-2012-211](https://www.riksdagen.se/sv/dokument-lagar/dokument/svensk-forfattningssamling/taxitrafiklag-2012211_sfs-2012-211)

Shuruudaha caafimaad ee taraafikada – Hey’adda gaadiidka

[https://transportstyrelsen.se/globalassets/global/publikationer/vag/trafikmedicin/produkter/de\\_medicinska\\_kraven\\_2018-02-01\\_webb.pdf](https://transportstyrelsen.se/globalassets/global/publikationer/vag/trafikmedicin/produkter/de_medicinska_kraven_2018-02-01_webb.pdf)

Sharciyada iyo talooyinka guud ee Hey’adda gaadiidka (TSFS 2010:33) ee ku saabsan garashada xirfadda ee kaarka aqoonsiga taksi-wadidda.

[https://www.transportstyrelsen.se/TSFS/TSFS%202010\\_33k.pdf](https://www.transportstyrelsen.se/TSFS/TSFS%202010_33k.pdf)

Sharciyada iyo talooyinka guud ee Hey’adda gaadiidk (2010:32) ee ku saabsan imtixaanka wadidda ee kaarka aqoonsiga taksi-wadidda.

[https://www.transportstyrelsen.se/TSFS/TSFS%202010\\_32k.pdf](https://www.transportstyrelsen.se/TSFS/TSFS%202010_32k.pdf)